



N3 (Mötesplats för ung kultur) Goobta kulanka dhaqan dhalinyarada

N3 Goobta kulanka dhaqan dhalinyarada waa meel aad ku dhabeyn karto riyadaada kuna abuuri karto mustaqbalkaada. Howsheenu waa inaan xiisegelino oo aan difaacno hal-abuurka bani'aadanka, soo saarida wax iyo awooda qaabeynta. Waxan ka amba qaadeynaa in qof kastaa xaq u leeyahay soo bandhiga naftiisa.

Xiligii guga ee 2011 ayaa meesha hal-abuurka (Innovatumområdet) laga furay N3 Mötesplats för ung kultur. Halkaa waxa ku yaal dhismo carbis, qolal daans, kuwo muusig, black box, masrax naadi, qolal sawir, kuwo mediastudio, istuudiyo maqal iyo qolal waxyaabaha kale ee aan la fileyn.

Waxa jira waqtiga ay furan yihiin goobahaa oo sakhi ah iyo albaabka laga galana uu ku yaalo kafee fiican. N3 Klubbscen och Black box waa masraxyada dhaqanka dhalinyaro ee cusub ee Trollhättan ahna heer sare oo la jecel yahay.

N3 Kulturbyrå – dhaqan caruur iyo dhalinyaro

Caruurta iyo dhalinyarada waxey xaq u leeyihiin iney ka qeyb qaataan xusuusta farshaxanka iyo dhaqanka oo leh tayo sare. N3 Kulturbyrå waxey ka dhex shaqeysaa dugsiiga ka horeeya xanaanada, dugsiiga hoose/dhexe iyo kan qaaska ah si dhamaan caruurta Trollhättan u helaan fursadaan. Si wadajira wakiilka dhaqanka iyo ardayda waxan soo bandhigeynaa waxyaabo iskugu jira dhamaan noocyada farshaxanka masraxa, shineemada iskuulka, safar dhaqan iyo booqasho qoraa.

Howsha waxbarasho, ee lagu xiray howsha iskuulka, ayaa sanad kasta soo saara barnaamij badan. Waxey idiin heynaa hal-abuur dhanka filimada, daanska, riwaayadaha, qoraalka, sawir & qaab, muusig iyo howlo waxbarasho banaanka ah. Barayaasheena ayaa waxey la shaqeeyaan shaqaalaha kale ee iskuulka.

N3 Kulturbyrå waxey dhamaan caruurta inta ay yar yihiin kula kulmayaa oo tijaabinayaa qaababka dhaqan ee kala duwan iyagoo heleya hogaan waaya arag ah. Waxan idin heynaa taa kadib fursad ah inaad isla barayaashaa ay kula socdaan markaad tagto iskuulka dhaqanka ee (N3 Kulturskola)..

N3 Kulturskola - iskuul dhaqan

50 sano ayaa la furay iskuulka muusiga ee Trollhättan. Howlaha iskuulka ayaa sanadaha oo dhan sii kordhayey isna bedelayey, iyadoo ujeedada cad iyo aheyd in ardayga baahidooda lagu hago howlaha meesha ka socda. Dhowr howlo ayaa ku soo kordhay mudada kadib. Iskuul marki hore loogu tala galay muusig kaliya ayaa isku bedelay iskuul dhaqan, maantana noqday iskuul N3 Kulturskola (iskuul dhaqan ee N3).

Waxa jira waxyaabo badan oo la kala dooran karo iyo ugu yaraan hal maado oo kugu quman. Waxa jira in lagu barayo tumidda qalab kala duwan iyo heesidda, qoridda heesaha, daans, tiyaatar, sawir & qaab, siirkus iyo filin. Waxan heynaa koorsooyin dhaadheer iyo kuwo gaagaaban intaba iyo siminaaro iyo workshop-yo.

Markaad barato asaaska waxad fursad u heleysaa inaad u soo bandhigto shacabka ama ka qeyb qaadato bandhigyo iwm. Maadadeey doonto ha noqoto tan aad jeceshahay, waad baran kartaa waxadna ku baran kartaa si dhaqso badan sida aad moodeyso!

N3 (Tababare wax soo saar leh) Kreativ Coaching

Tababarayaasheena wax soo saarka leh waxey ka shaqeeyaan iney kaa caawiyaan sidi aad u hirgelin laheyd fikradahaaga, mashruuc iyo raacidda muuisga qoran. Waxey kaa caawinayaan inaad hesho howlaha N3 waxa kaa anfacayo. Waxey u dhago nugul yihiin himiladaada, iyagoo ku baraarujinaya, kula talinayo kuna xiisegelinaya. Waxey ku tusinayaan waxyaabaha jira oo aad heli karto sida goobo, tekniko iyo meelo aad ku xiranto.

Tababarayaasha wax soo saarka leh waxey kaa caawinayaan dalabka lacagaha dhalinyarada waxana suura gal u ah iney kuu weydiyaan workshop-yo ama koorsooyin si aad u gaarto goolkaada.

Tababarayaasha wax soo saarka leh waxey kugu dhiirigelinayaan inaad kaligaa talowsato, isticmaalka saameynta iyo iyagoo kaa caawinaya inaad xiriir la sameyso inta kale ee aad u baahan tahay.

Tababarayaasha wax soo saarka leh waxey la shaqeeyaan raadinta lacagta dhalinyarada, dhismo carbis, istuudiyo maqal, mediastudio, xafladda nofeembar, workshop-yo iyo waxyaabaha kale ee aan la fileyn. Soo dhowow!